

(Somali)

## **Yaa nidaamiyo xirfadlayaasha xanaanada caafimaadka iyo bulsho?**

### **Maxaa ka rajaynaysaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo bulshada?**

Waxaad ka rajaynaysaa takhtarkaaga, kal-kaaliyahaaga, takhtarkaaga ilkaha, hawlwadeenkaaga bulsho iyo xirfadle kasto ee caafimaad iyo bulsho ee kale inay:

- kuula dhaqmaan si karaamo leh iyo xushmad;
- lahaadaan xirfadaha iyo aqoonta ay kugu daaweeynayaan ama kugu xanaaneeyaan; iyo
- muujiyaan heer sare ee akhlaaq ah.

Waxaad kale oo aad ka rajaynaysaa inuu qof ka qaado fal haddii aad ka welwelsan tahay waxa ku saabsan habka daawaynta ama xananaynta oo ay ku siiyeen.

### **Yaa hubinaayo in heerarkan la gaaro?**

Waxaan nahay 13 urur, ee loo yaqaan nidaamiyayaasha xanaanada caafimaadka iyo bulshada. Mid kasto oo naga mid ah waxuu la soconayaa hal ama ka badan oo ah xirfadayaasha xanaanada caafimaadka iyo bulshada annagoo nidaaminayno xirfadaha ee dhammaan UK iyo annagoo hubinaayno in la gaaro heerarkan.

Waxaa inoola abuuray inaan badbaadino dadwaynaha, iyo inaan hubino in meel kasto oo aad ku aragtid qof qabto xanaanada caafimaadka iyo bulshada gudaha UK (ha ahaado khaas ama NHS) aad habsan karto inay garaan heerarkeena. Waxay warqaddaan kuu sheegaysaa waxa ku saabsan shaqada aan samayno iyo sida inoo la soo xiriiro.

### **Waxaa rajaynaysaa inaad lahaatid xirfadle leh xirfadlayaasha iyo aqoonta lagu bixiyo heerka sare ee daawaynta ama xananaynta**

Waxay tahay qaybta muhiimka ah ee doowrkeena inaan hubino in xirfadlayaasha xanaanada caafimaadka iyo bulshada ka shaqeeyo UK ay lahaadaan xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan yahiin si ay ku shaqaystaan. Waxaan so dejinay heerarka casharadooda iyo tabobariddooda.

Si loo hubiyo inaad ka heshid keliya daawayn iyo xanaano kuwa gaaro heerkeena, mid kasto ee naga mid ah waxuu hayaa diiwaan. Sharci ahaan, waxaa loo oggol yahay oo keliya in diiwaanadaan lagu qoro dadka ka soo baxo heerarkeena.

### **Waxaa ka rajaynaysaa xirfadlahaaga inuu muujiyo heer sare ee akhlaaq ah**

Waxay kale oo ay nidaamayayaasha dhigeen heerarka akhlaaq ee laga rabo in xubnaha xirfad kasto dhoowraan. Waxaan siinaa tusmooyin ku saabsan waxa loo haysto inay yahiin akhlaaq la oggolaan karo. Waxaan u la dhaqmaynaa si xun guuldarraysiga wax looga qabanaayo heerarkan.

### **Waxaad rajaynaysaa inuu qof ka qaado fal haddii aad ka wel-welsan tahay heerka daawaynta ama xananaynta ee lagu siiyay**

Haddii aad ka wel-welsan tahay awoodda ama akhlaaqda qofka ku xanaaneynaayo, waxaad si toos ah ugu tegi kartaa qofkaas, ama shaqo-bixiyahiisa. Waxaad awood u leedahay inaad ka heshid talosiin urur ama adeegga sida Xafiiska Talosiinta Muwaadanka (Citizens Advice Bureau), Adeegyada Madaxabanaan ee U doodidda, Golaha Caafimaadka Jaaliyadda ama Talosiinta Bukaanka ee deegaanka iyo Adeegga Isku-duwaha.

Waxaad kale oo ka qaadi kartaa fal lagu badbaadinaayo dadwaynaha. Waxaan samayn karnaa baaris cabashooyinka ku saabsan shaqaalaha diiwaan-gashan. Haddii xaaladda ay aad u xun tahay, waxaan ka qaadi karnaa xaqqooda ku shaqaysiga ee dalka ay khusaydo, ama dalalka, ee UK.

## Yaa la diiwaangeliyaa?

Si looga shaqaysto mid ka mid ah xirfadaha hoos ku liisgaraysan, waa inuu qofka iska diiwaan geliyaa xukunka ay khusaydo. Haddii uusan iska diiwaan gelin oona weli sii shaqaysto, waxuu jeebinayaa sharciga waana lagu soo dacwaynayaa.

Waxay diiwaanayaasheena u furan yahiin dadwaynaha. Sidaas darted, haddii ad doonaysid inaad baartid haddii qof ka diiwaan-gashan yahay waxaad sidaasi ku samayn karaa adigoo na soo wacaayo ama ka eegaayo shabakadaha internet-ka.

**Haddii aad doonaysid nuqulo badan ee warqaddaan, fadlan u soo dir email [regulators@hpc-uk.org](mailto:regulators@hpc-uk.org). Haddii aad ku doonaysid nuqaladaan luqado kale ama nuqulo ku qoran daabacaadda farta-waawayn, fadlan waxaad u soo booqataa shabakadaheena**

## Nagala soo xiriir:

### Healthcare (Xanaanada Caafimaadka)

General Chiropractic Council (GCC)  
Chiropractors  
Telefoonka: 020 7713 5155 or [www.gcc-uk.org](http://www.gcc-uk.org)

General Dental Council (GDC)  
Takhaatiirta ilakaha, ilko-daaweeyayaasha, ilko-nadiifiyayaasha  
Laga soo bilaabo 31 Luulyo 2006 – kal-kaaliyayaasha ilkaha, farsamayaqaanada ilkaha iyo daaweeyayaasha ilkaha  
Telefoonka: 020 7887 3800 ama [www.gdc-uk.org](http://www.gdc-uk.org)

General Medical Council (GMC)  
Takhaatiirta  
Telefoonka: 0845 357 8001 ama [www.gmc-uk.org](http://www.gmc-uk.org)

General Optical Council (GOC)  
Takhaatiirta Aragga  
Telefoonka: 020 7580 3898 ama [www.optical.org](http://www.optical.org)

General Osteopathic Council (GosC)  
Takhaatiirta Osteopaths'ka  
Telefoonka: 020 7357 6655 ama [www.osteopathy.org.uk](http://www.osteopathy.org.uk)

#### Health Professions Council (HPC)

Daaweeyayaasha Fanka, culumada biyomeedikada, takhatiirta lugaha, takhatiirta carruurta, cilumada kiliinikada, xirfadlayaasha cunto-dheelitirka, daaweeyayaasha cudurada shaqada, takhaatiirta waaxda hawlqabadka, takhaatiirta lafaha, kal-kaaliyayaasha takhaatiirta, fisiyoterabiistayaasha, takhaatiirta prosthetis'ka iyo kuwa lafaha, raajiyo-saarayaasha, ku daaweeyayaasha hadalka iyo luqadda  
Telefoonka: 020 7582 0866 ama [www.hpc-uk.org](http://www.hpc-uk.org)

#### Nursing and Midwifery Council (NMC)

Kal-kaaliyayaasha, umulasoooyinka iyo kal-kaaliyayaasha takhasuska u leh caafimaadka guud ee jaaliyadda  
Telefoonka: 020 7333 6622 ama [www.nmc-uk.org](http://www.nmc-uk.org)

#### Royal Pharmaceutical Society of Great Britain (RPSGB)

Farmashiistayaasha, farsamo-yaqaanada farmashiyaha (xur ayay u yahiin inay is-diiwaangeliyaan) meelaha farmashiyayaasha ku yaalaan  
Telefoonka: 020 7735 9141 ama [www.rpsgb.org](http://www.rpsgb.org)

#### Pharmaceutical Society of Northern Ireland (PSNI)

Farmashiistayaasha iyo meelaha farmashiistayaasha ee Waqooyiga Ayrland  
Telefoonka: 02890 326927 ama [www.psni.org.uk](http://www.psni.org.uk)

#### Council for Healthcare Regulatory Excellence (CHRE)

Waxay ujeeddadooda tahay badbaadinta dadwaynaha, horumarinta shaqo u samaynta ugu fiican iyo dhiirigelinta fiican ee sagaalka nidaamiyayaal ee xirfadlayaasha xanaanada caafimaadka ee ku liis-garaysan kor [www.chre.org.uk](http://www.chre.org.uk)

### Social care (Xanaanada Bulshada)

Golayaasha waxaa diiwaangelinayaan kooxo ama hawlwadeeno kale ilaa waqti. Waxaad faahfaahinta ka heli kartaa gole kasto.

#### Care Council for Wales

Xoogga shaqo ee xanaanada bulshada, shaqaalaha bulsho ee takhasuska leh, iyo ardayda shaqada bulshada ee u leh shahaaddada ee Wales  
Telefoonka: 0845 0700 399 ama [www.ccwales.org.uk](http://www.ccwales.org.uk)

#### General Social Care Council (GSCC)

Shaqaalaha xanaanada bulshada, iyo ardayda shaqada bulshada ee u leh shahaaddada ee England  
Telefoonka: 020 7397 5100 ama [www.gsccl.org.uk](http://www.gsccl.org.uk)  
Minicom: 020 7397 5103

#### Northern Ireland Social Care Council (NISCC)

Shaqaalaha xanaanada bulshada, iyo ardayda shaqada bulshada ee u leh shahaaddada ee Waqooyiga Ayrland  
Telefoonka: 02890 417600 ama [www.niscc.info](http://www.niscc.info)  
Telefoonka qoraalka leh: 02890 239340

#### Scottish Social Services Council (SSSC)

Shaqaalaha xanaanada bulshada, shaqaalaha bulshada, iyo ardayda shaqada bulshada ee u leh shahaaddada ee Skotland  
Telefoonka: 0845 6030 891 ama [www.sssc.uk.com](http://www.sssc.uk.com)